Su'aallaha Guud ee Ku Saabsan Nidaamka IEP

SOMALI

Dukumentigan waxaa si wadajir ah u wada qoray Wakaalada Waxbarashada Khaaska ah ee Iskuullada Dawladda ee Degmada Nashville iyo Gollaha La-talinta Qoysaska Ardayda Waxbarashada Khaaska ah qaata.Su'aallaha tooska ee Wakaalada Waxbarashada Khaaska ah waxaa lagu hagaajin karaa EEQUESTIONS@mnps.org.

IEP waa dukumenti qoran oo loogu talagalay ardayga ay haysato naafanimo mid ama ka badan, waxaana diyaariya, dib u eega sidoo kale dib wax uga bedela ugu yaraan sanadkiiba mar xubnaha IEP. Shuruucda federaalka iyo qawaaniinta gobalku waxay qeexayaan in macluumaadka arday walba oo qaata IEP la diiwaangeliyo, sidoo kalena wuxuu u dhigayaa in la diyaariyo IEP bilowga sanad dugsiyeedka. Dukumentigan waxaa lagaga hadlaa qaar ka mid ah khaladaadka ugu badan ee dhaca inta ay socoto hawsha IEP si waalidiinta loogu fasaxo inay ogaadaan xuquuqdooda.

1. Imisa jeer ayaan codsan karaa kulanka IEP?
   - Waalidka ama xubin walba oo ka mid ah IEP wuu codsan karaan kulanka IEP mar walba

2. Ma khasabaa in kulanka la qabto waqti ama maalin cayiman?
   - Waa in waqtiga iyo goobta lagu qabanayo la isku raaco. Waalidka waa in la siiyo fursado uu ku doorta maalinta iyo saacada, waana inaysan ku koobnaan mid keliya haddii aysan waalidka u saamaxayn. Waxaa loo baahan yahay in la wargeliyo toban beri ka hor.

3. Qofkee la rabaa inuu ka qaybgalo kulanka IEP?
   - Xubnaha IEP waa inay ku jiraan Macallinka Waxbarashada Khaaska ah, Macallinka Waxbarashada Guud, Maamulka Iskuulka, Waalidiinta iyo Ardayga haddii uu jiro 14 sano ama ay munaasab ku tahay.
   - Sidoo kale xubnaha waxaa ka mid noqon kara macallin ku takhasusay cilmi nafsiga haddii loogu baahdo naiijooyinka imtixaanka ama Bixiyeyaasha Adeegyada La Xiriira sida (SLP, OT, PT, Araga, Maqalka, iwm.) haddii ardagu helo adeegyadan.

4. Qofkee u soo kaxaysan karaa kulanka IEP ilmahayga?
   - Waalidku wuxu soo ka xaysan karaa ama casuumi karaan qof walba oo ay rabaan inuu ka qaybgalo kulanka IEP ilmahooda.
   - Waalidka ayaa masuuliyadi ka saaran tahay inuu wargeliyo maalinta iyo waqtiga kulanka la qabanayo qof walba oo uu rabo inuu ka soo qaybgalo.

5. Waqti intee le'eg ayey tahay in loo qoondeeyo kulamada IEP?
   - Caddadka waqtiga loo baahan yahay in lagu diyaariyo waxbarasho munaasab ku ah IEP waxay ku xiran baahida gaarka ah ee ardayga, waana in waalidka loo ogolaado inuu si macno weyn ku fadhida uga qaybgalo diyaarinta IEP.
   - Marka kulanka la bilaabayo, xubnuhu waa inay xusaan waqtiga kulanku socon doono; si iskuulladu u xaqiijiyaan in ardayda oo idil helaan waxbarashadooda, taakulooyinkooda iyo adeegyadooda. Haddii ay dhacdo in qof ka mid ah xubnaha u baahdo waqti dheeraada, kulanka waxaa dib la isugu soo noqon doonaa waqti kale iyadoo laga duulayo shuruuda ku xusan lambarka 2aad.

6. Ma la i siin doonaa nuqul qabyo-qoraala kahor intaan la qaban kulanka IEP?
   - Habka ugu fiican waa in waalidka la siiyo qabyo-qoraalka IEP-ga la soo jeediyey. Sharciga gobalku u dejiyey wuxuu dhigayaa in loo baahan yahay qabyo-qoraal. Qabyo-qoraalka waxaa loo diyaariyaa si loo siiyo waalidka fursad uu ugu muraajiceeyo waxyaabaha la soo jeediyey sida Kaalinta Heerarka Waxbarashada Waqtigan, Himilooyinka Sanadka La-cabiri karo, iyo Fududaynta ama Wax ka bedelida.

7. Hadalka kulanka ma duubi karaa?
   - Haa, balse waalidku waa inuu wargeliyo ugu yaraan qof ka mid ah xubnaha IEP in kulanka la duubi doono, sida ku cad xeerka gobalka Tenn. Code Ann. § 39-13-601.

8. Maka bixi karaa kulanka mid ahaan xubnaha ugu muhiimsan ee ka qaybgalaya IEP-ga?
   - Qoraalka heshiiska waalidku wuxuu dhigayaa inaan qof ka mid ah xubnaha kulanka ka soo qaybgelaya iman ama ay u ogolaadaan inuu baxo intaan kulanka la soo gebagebayn. Waxaa jira shuruudo gaara oo loo baahan yahay in la buuxiyo kahor inta aan waalidka la weydiin inuu ogolaado cafiska ama fasaxa. Haddii waalidku aanu aqbalin cafiska, waa in maalin kale loo balamo sida ku cad shuruuda qodobka 2aad ee kor ku

xusan; sidoo kale haddii waalidku aanu aqbalin fasaxa, kulanka IEP waa la joojin doonaa waxaana la go'aamin doonaa maalin kale oo la isku soo noqdo sida ku cad qodobka 2aad.

9. Imisa jeer ayaa ilmahaygu u baahan yahay in qiimayn lagu sameeyo?
   - Ardayda buuxiya shuruudaha adeegyada waxbarashada gaarka ah waa in dib loo qiimeeyo ugu yaraan 3dii sanadoodba mar, sidoo kale xubnaha IEP waa inay dhammaystiraan Khulaasada Dib-u-qiimaynta si loo ogaado nooca dib-u-qiimaynta loo baahan yahay.
   - Sidoo kale dib-u-qiimayntu waxay dhici kartaa intaan la gaarin 3 sano si loo ogaado naafanimada kale ee waqtigan, si loo ogaado naafanimo kale oo hore u jirtey, si loo bixiyo macluumaadka barnaamijka la qorshaynayo, ama dib loogu caddeeyo ardayda hela adeegyada haddii ay horumar weyn sameeyaan.

10. Ka waran haddii aanan ku raacsanayn qiimaynta waqtigan la sameeyey?
    - Waxaad xaq u leedahay inaad heshid Qiimayn Waxbarasho oo Madax-banaan (IEE) iyadoo iskuulku kharashka bixinayo haddii aadan ku raacsanayn qiimaynta ilmahaaga ee iskuulku helay 34CFR§300.502.

11. Ka waran haddii aanan ku raacsanayn adeegyada IEP ama ilmahaygu aanu helayn adeegyada?
    - Haddii aad ku jirtid kulan lagu samaynayo IEP cusub oo xubnaha ka qaybgelaya kulanka aysan isku raacin adeegyada, waxaad hakin kartaa kulanka waxaadna kala dooran kartaa fursadahaaga sida hoos lagu xusay. Haddii IEP hore loo diyaariyey, waxaad codsan kartaa kulanka IEP sidoo kale waxaad tabashooyinkaaga soo gudbin kartaa mar walba. Haddii aan xal la hayn, raac shuruudaha loogu talagalay in wax lagaga qabto khilaafka sida ku xusan hoos iyo buuga dhowritaanka nidaamka.
    - Haddii aan ilmahaagu adeegyada helin, arinkan waa in laga hadlo inta kulanka IEP socdo.
    - Hoos u dhaca taakulooyinka iyo shaqaaluhu ma aha shaqo u taal waalidka.

12. Ma codsan karaa inaan arka xogta xoojinaysa horumarka ku waajahan himilooyinka waxbarashada?
    - Waalidiintu way codsan karaan sidoo kale waxay dib u eegi karaan horumarka lagula socdo xogta ama imtixaanada kale ee la adeegsaday si loo diyaariyo heerarka waqtigan ee kaalinta waxbarashada/himilooyinka IEP.

13. Ma ka bixi karaa kulanka IEP sababtu waxay doonto ha noqotee oo ballan maalin kale ma qabsan karaa?
    - Waalidiintu way ka bixi karaan kulanka IEP sababtu waxay doonto ha noqotee.

14. Miyaan u baahnahay inaan saxeexo kulanka IEP?
    - Maya. Marka la soo gebagebeeyo kulanka, qof walba oo ka qaybgala kulanka waxaa la weydiin doonaa inay ku saxeexaan magacyadooda iyo taariikhda bogga kaqaybgalka IEP. Haddii aan waalidku ku qanacsanayn saxeexa bogga uga danbeeya ee wargelinta ogolaanshaha waqtigaas, wuu ka bixi karaa kulanka isagoon boggaa saxeexin.
    - Haddii aan heshiis la gaarin, wax isbedel ah la samayn maayo (sidoo kale adeegyo cusub lama bixin doono) 14 maalmood si waalidiintu awood ugu helaan xuquuqda ay sharciga u leeyihiin inay ku fayl-gareeyaan habraaca sharciga. Maalinta 15aad iskuulku wuxuu u hirgelin doonaa IEP sida loo soo jeediyey. Shuruucda iyo Qawaaniinta Tennessee §0520-01-09-13.

15. Waqti intee le'eg ayuu socdaa dacwadu socotaa?
    - Hannaanka sharciga waxaa la bilaabaa markaad qoraal cabasho ah ka soo gudbisid iskuulka.
    - Kulanka lagu xalinayo waa in la qabto 15 beri gudahood maalinta la helo ogeysiiska cabashada hanaanka shariciga, haddii aan waalidka iyo gudoonku isku raacin inay ka tanaasulaan kulanka ama ay isku raacaan qoraal si ay uga tanaasulaan kulanka ama ay isku raacaan inay adeegsadaan nidaamka dhexdhaxaadinta.
    - Haddii aan la gaarin wax heshiisa, waxaa jira in dacwadaada si sharci ah loo dhegeysto.
    - Nuqulka go'aanka sarkaalka dhegaysanaya waa in boosta la soo dhigo qof walba 45 beri gudahood.
    - Waqtiga ay qaadato in la soo gebagebeeyo ashkatada way kala duwan yihiin waxayna ku xiran tahay inta ay socoto dhegaysiga tabashadu.

Ma jiro wax halkan ku jira oo loogu talagalay in lagu bedelo Ogeysiiska Dhowritaanka Nidaamka waalidiintu sanad walba hesho, ee laga heli karo https://www.tn.gov/content/dam/tn/education/reports/331816_notice_proc_safeguards.pdf

Faahfaahin kale booqo:
https://www.tn.gov/content/dam/tn/education/special-education/sped_framework.pdf